

PLACE
STAMP
HERE

DEPARTMENT OF SOCIAL & HEALTH SVCS
DIVISION OF CHILD SUPPORT
PO BOX 11520
TACOMA WA 98411-5520

NAME

ADDRESS

CITY/STATE/ZIP

Ma yahay macluumaadkayga shakhsiyeed mid lala wadaago dhinaca kale?

Qaybta Taakulaynta Ilmaha ama qareenka dembi oogista ayaa la wadaagi kara dukumeentiyo kasta oo aad nasiisid dhinaca kale oona gelin kara dukumeentiyada faylka maxkamada dadweynaha.

Haddii aad codsatid dib u habbeyn, waalidka kale wuxuu xaq u leeyahay in uu arko macluumaadkaaga dhaqaale iyo macluumaad kasta oo aad doonaysid in ay maxkamadu tixgeliso. Waxaad ka saari kartaa macluumaadkaaga shakhsiyeed (cinwaanka, taariikhda dhallashada, lambarka dammaanada bulshada) dukumeentiyada kahor inta aadan noo dhiibin.

Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxay sidoo kale la wadaagi kartaa macluumaadka gobolo kale iyo wakaalado dowladeed si loogu sameeyo aasaasid, dib u habbeyn ama fullin taageerada ilmaha ah. Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxay sii deynaysaa macluumaadka keliya sida lagu oggolaaday xeerarka iyo qaanuunada dowlada iyo gobolka.

Waa in aad ku leedahay kiis furan (adeego fullin buuxa) oo taageerada ilmaha ah Qaybta Taakulaynta Ilmaha si aad u qaadatid ama u heshid caawimaadeena hawsha dib u habbeynta ah. Si aad u furatid kiis, soo wac ama usoo dir foomka lagu soo lifaaqay gadaasha buuggarahaan, ama ka gal boggaan internetka halkan: www.dshs.wa.gov/dcs.

- Weydiiso codsi loogu talagalay adeegaha.
- Weydiiso Qaybta Taakulaynta Ilmaha in ay muraajaco kusamayso amarkaaga loogu talagalay dib u habbeynta.

Khasab miyay igu tahay in aan ka qayb qaato muraajacada dib u habbeynta ama hawsha dib u habbeynta?

Haddii aad qaadatid TANF oona ka cabsatid in hawsha muraajacadu ama dib u habbeyntu ay khatar ugu sugnaan karto adiga ama carruurta jooga qoyskaaga, waxaa khasab kugu ah in aad la xiriirtid Qaybta Adeegaha Bulshada (CSD) si aad u sheegatid sabab macquul ah ama wanaagsan oo aadan ula shaqayn karin taageerada ilmaha. Haddii la bixiyo Heerka Sababta Wanaagsan ee A, Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxay xireysaa kiiskaaga. Haddii tallaabada dib u habbeynta ay tahay mid hore loogu fayl gareeyay ama loogu direy maxkamada, waxay noqon kartaa mid adag in la joojiyo waayo way soo dib dhacday.

Haddii aadan qaadan TANF, waxaad ka codsan kartaa Qaybta Taakulaynta Ilmaha in ay xirto kiiskaaga, laakiin waalidka kale wuxuu codsan karaa adeegaha Qaybta Taakulaynta Ilmaha.

Wixii kusaabsan macluumaad dheeri ah, la hadal Qaybta Taakulaynta Ilmaha, Qaybta Adeegaha Bulshada ama barnaamijka rabshada guriga ee deegaankaaga. Waxaad ka heli kartaa macluumaad tooska internetka ah halkan www.wscadv.org.

Sharootada Halkan Ku xir Kahor inta aadan Dirin

Wac xafiiska Qaybta Taakulaynta Ilmaha kuugu dhow ama wac 800-442-KIDS (5437) si aad u oggaatid xafiiska gacanta ku haya kiiskaaga.

Xafiisyada Qaybta Taakulaynta Ilmaha

Everett	800-729-7580 425-438-4800
Kennewick	800-345-9981 509-374-2000
Olympia	800-345-9964 360-664-6900
Seattle	800-526-8658 206-341-7000
Spokane	800-345-9982 509-363-5000
Tacoma	800-345-9976 253-597-3700
Vancouver	800-345-9984 360-696-6100
Wenatchee	800-535-1113 509-886-6800
Yakima	800-441-0859 509-249-6000
Saldhigyada	800-457-6202 360-664-5000

Barnaamijka Taageerada Ilmaha
Gobolka Washington



Bedelaada Amarka Taageerada Ilmaha

Muraajaco iyo Dib u habbeyn

Amarada taageerada ilmaha ma ahan kuwo marwalba sii wada isbedelada ku dhaca noloshu waalidiinta iyo carruurtooda. Bedelaada amarka taageerada ilmaha waxaa lagu magacaabaa. Qaybta Taakulaynta Ilmaha ee Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada (DCS) waxay awoodi kartaa in ay kugu caawiso dib u habbeynta amarkaaga.

